Baadhitaanada La-socodka

Xaaladaha gurracan ee aashitada "Amino acid"

argininosuccinic acidemia (ASA)
citrullinemia
homocystinuria
maple syrup urine disease (MSUD)
phenylketonuria (PKU)
tyrosinemia type 1

Xaaladaha gurracan ee aashitada "Fatty acid"

carnitine uptake deficiency (CUD)
long-chain L-3-hydroxy acyl-CoA dehydrogenase (LCHAD) deficiency
medium-chain acyl-CoA dehydrogenase (MCAD) deficiency
trifunctional protein (TFP) deficiency
very-long chain acyl-CoA dehydrogenase (VLCAD) deficiency

Xaaladaha gurracan ee aashitada "Organic acid"

3-hydroxy-3-methylglutaric aciduria (HMG)
beta-ketothiolase deficiency (BKT)
glutaric acidemia type 1 (GA-I)
isovaleric acidemia (IVA)
methylmalonic acidemias (CblA,B and MUT)
multiple carboxylase deficiency (MCD)
propionic acidemia (PROP)

Xaaladaha gurracan ee kale

biotinidase deficiency
congenital adrenal hyperplasia (CAH)
congenital hypothyroidism
cystic fibrosis (CF)
galactosemia
hemoglobinopathies

Ilmahayga ma lagala socon karaa xaalado guracan oo kale?

Haa. Ogaanshaha hore ee dhaga-culaysku wuxu horseedaa wanaajinta xirfadaha hadalka iyo afka. Dhammaan isbitaaladu waxay bixiyaan la-socodka ilmaha-cusub.

Waxa dheer, waxa jira xaalado nadir ah oo gurracan oo la ogaan karo muddada ilmuhu cusub yahay. Wixii macluumaad dheeraad ah, kala hadal ilmahaaga takhtarkiisa.

Asturnaanta Hawlaha

Waaxda Caafimaadka waxa sharci ahaan laga rabaa inay dhawrto ilmaha cusub iyo qoysaskooda oo hubiso in dhammaan foomamka muunadaha/macluumaadka loo gudbiyo hawlaha la-socodka ay ka dhawran yihiin adeegsi ama helitaan aan habboonayn. Isaga oo kooban rabitaanada sharciga ayaa hoos ku yaala. Rabitaanada gaarka ah waxa lagu sharxay Qaybta 246-650-050 WAC. Nuqulada waxa lagu heli karaa codsi ama bogga internetka www.doh.wa.gov/nbs.

Foomamka hawsha muunadaha la-socodka waxa lagu keydiyaa meel asturan oo ku taal Shaybaadhyada Caafimaadka Dadweynaga ee Gobolka ilaa 21 sanno sida waafaqsan Fiqrada 70.41.4190 RCW. Kadib wakhtigaas, muunadaha waa la baabiiyaa. Waaxda Caafimaadka ayaa baabiin karta muunada kahor 21 sanno haddii ay codsi qoraal ah ka hesho waalidka ama wakiilka ama kadib marka laga qabto dhammaan baadhitaanada loo baahan yahay.

Helitaanka foomamka muunadaha la-socodka ilmaha-cusub waxay ku eg tahay shaqaalaha Waaxda Caafimaadka iyo dadka loo oggol yahay ee oggol rabitaanada adag ee asturnaanta. Oggolaanshe qoraal ah oo waalidka ayaa looga baahan yahay wixii daraasad u baahan macluumaad mucayan ah iyo badi ujeedooyinka kaleba. Fasaxa muunadaha ama macluumaad kale waa inay waafaqsanaadaan Sharciga Macluumaadka Caafimaadka ee Gobolka (Fiqrada 70.02 RCW) iyo xeerarka asturnaanta iyo badbaadada ee Fiqrdada 246-650 La-socodka Ilmaha-cusub.

Waxa jirta ujro keliya ilmihiiba ee hawsha la-socodka. Muunadaha dheeraadka ah waxa lagu baadhaa ujrad la'aan. Hase ahaatee, takhtarkaaga ayaa laga yaabaa inuu ujrad kaaga qaado qaaditaanka muunada. Baadhitaanada cilad-sheegida, haddii loo baahdo, waxay yeelan karaan kharash dheeraad ah.

Xaashidan waxa lagu heli karaa afafka: Kaamboodiyan, Shiine, Kuuriyaan, Laa-oshiyan, Ruush, Soomaali, Isbaanish, iyo Fiyatnaamiis.

Dadka naafoda ahi, xaashidan waxay ku heli karaan qaab kale haddii ay codsadaan. Si aad u gudbiso codsi fadlan wac 1-866-660-9050.

Baadhitaanada La-socodka Ilmaha-cusub & Ilmahaaga



Newborn Screening Program
P.O. Box 55729
1610 NE 150th Street
Shoreline, WA 98155-0729
Phone: (206) 418-5410
1-866-660-9050
FAX: (206) 418-5415
Email: NBS.Prog@doh.wa.gov
Website: www.doh.wa.gov/nbs

Washington State Department of Health

DOH 304-007 July 2008 Somali

Maxay tahay la-socodka ilmaha-cusub?

La-socodka ilmaha-cusub waa hab lagu ogaado ilmaha halista u ah xaaladaha ba'an ee la daawayn karo, laakiin aan muuqan marka uu dhasho. Sharciga gobolka ayaa raba in dhammaan ilmaha ku dhasha Washington lagala socdo xaaladaha qaar kahor intaanay ka bixin isbitaalka (Fiqrada 70.83 RCW). Inkasta oo sharciga lagu dabaqo ilmaha ku dhasha isbitaalada, waa muhiim in ilmaha ku dhasha dibedda isbitaalka uu helo daryeel tayo ahaan la mid ah.

Maxay muhiim u tahay la-socodku?

La-socodkani wuxu qeexayaa xaaladaha, haddii aan la garan oo aan hore loo daawayn, keeni kara fadhiidnimo maskaxeed, jirro ba'an ama xataa dhimasho. Ilmaha-cusub wuxu u muuqan karaa caafimaad-qab, laakiin wuxu yeelan karaa xaalad ba'an. Hore u-helitaanka dhibaatooyinkaas iyo daaweyntoodu waxay ka hortagi karaan dhibaatooyin ba'an. Nasiib wanaag, daaweyn ayaa jirta looga hortagi karo ama si weyn lagu yarayn karo waxyeelaynta xaaladahaas.

Baadhitaanada la-socodka ilmaha-cusub waa hal shay oo muhiim ah oo ilmaha lagu siiyo daryeelka caafimaad ee ugu wanaagsan ee suurtagal ah. Baadhitaanka dhiiga ee sahlan wuxu siin kara adiga iyo takhtarka ilmahaba macluumaadka caafimaadka ilmahaaga oo haddii kale aanad ogaateen.

Waa maxay xaaladaha guracan ee la ogaan karaa?

2008 gudihiisa, baaxadda la-socodka ayaa la ballaadhin doonaa oo ilmaha waxa laga baadhi doonaa 15 xaaladood oo dheeraad ah. Liistada xaaladaha oo dhan, fadlan ka fiiri dhabarka xaashidan.

Sidee loo sameeyaa la-socodka?

Dhammaan baadhitaanada waxa lagu sameeyaa dhibco dhiig ah oo laga qaado cidhibta ilmaha. Dhiigga waxa lagu ururiyaa waraaq gaar ah oo nuugta dhiigga oo loo diro Shaybaadhka La-socodka Ilmaha-cusub ee Caafimaadka Dadweynaha Gobolka ee Shoreline si loogu baadho. Isbitaalka ama takhtarka gudbiyey muunada ayaa loo soo sheegi doonaa natiijada dhawr maalmood gudahood.

Goorma ayaa la-socodka la sameeyaa?

Sharcigu wuxu rabaa in muunada ugu horraysa la qaado kahor bixitaanka isbitaalka, laakiin aan dhaafin 5 maalmood markuu ilmuhu jiro. Tani waxay u ogolaanaysaa ilmaha wax qaba in la daweeyo sida ugu dhakhso badan. Muunada joogtada ah ee labaad waa in la qaado inta u dhaxaysa 7 ilaa 14 maalmood da'da ilmaha, laakiin weli waxtar ayey u yeelanaysaa ilmaha da'da weyn. Baadhitaano dheeraad ah waa in la sameeyo marka uu codsado ilmaha takhtarkiisu.



Maxaa laba muunadood loo cayimay?

Xalladaha gurracan badidooda waxa lagu gartaa muunada hore, haddii xataa la qaado maalinta uu ilmuhu dhasho. Muunada labaad waxa loo cayimay sababta oo ah iyada oo xaaladaha qaar aan la ogaan karin ilaa ilmuhu yara weynaanayo.

Marmar laba muunadood wax ka badan ayaa la codsadaa. Taas macnaheedu ma aha ilmaha ayaa qaba mid ka mid ah ah xaadaha. Sababta ugu weyn ee loo codsado muunad dheeraad ah waa natiijada hore oo aan laga gun-gaadhin.

Maxaa dhacaya haddii xaalad guracan laga shakiyo?

Haddii baadhitaanka la-socodka ilmaha cusub ay muujiso suurtagalnimada dhibaato, takhtarkaaga ayaa lala xidhiidhi doonaa isla markiiba. Waxa la cayimi doonnaa baadhitaano lagu helayo cilada si daaweynta loo bilaabo bilaa daahitaan haddii ilmahaagu qabo mid ka mida xaaladahaas gurracan.

Sideen ku ogaanayaa natiijada?

Haddii aad wax su'aalo ah ka qabto natiijada baadhitaanada la-socodka ilmahaaga, fadlan la-xidhiidh takhtarkaaga. Haddii takhtarkaagu aanu haynin natiijada, wuxu la xidhiidhi doonaa Barnaamijka La-socodka Ilmaha-cusub si uu u helo nuqul.

Waalid ahaan, ma diidi karaa in la sameeyo la-socodka ilmaha-cusub?

Sharcigu wuxu siinaya waalidiinta xaqa ay ku diidi karaan baadhitaanka ilmahooda haddii baadhitaanku uu ka-horimanayo diinta ay aaminsan yihiin ama dhaqankooda. Haddii ay arrintu sidaas tahay, hubi inaad u sheegto shaqaalaha isbitaalka ama takhtarkaaga.

Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah oo la xidhiidha la-socodka ilmaha-cusub?

Wixii macluumaad dheeraad ah, kala hadal takhtarkaaga ama la xidhiidh Barnaamijka La-socodka Ilmaha-cusub adiga oo adeegsanaya macluumaadka ku yaala xagga hore ee xaashidan.